**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
Baarlamaanka Dowlad Gobaleedka Galmudug
**Xafiiska Guddoomiyaha**

جـــــــــــمـهـورية الصـومـال الفدرالية
لمجــلس التشـــــريعي لولايـــة جـــلمدج
مكتب الرئيس

*Federal Republic of Somalia*
**Galmudug State Parliament**
**Office of the Speaker**

**Tix:** XGBGM/0025/20 **Tar:** 27 October 2020

**Ku: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug Galmudug= Dhusamareb=**

**Ujeedo: Soo Gudbin Shuruuc uu Ansixiyey Golaha Sharci-dejinta DGGM**

**Mudane Madaxweyne,**

Iyada oo la tixraacayo warqadaadii sumadeedu aheyd Tix:XMGM/10/036 kuna taariikhaysneed 11/10/2020 kana timid Madaxweynaha DGGM u jeed-keeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedyo ka yimid Golaha Wasiirada si Baarlamaanku uga guto Waajibkiisa Dastuuriga ah.

Golaha Sharci-dejinta DGGM ayaa ku Ansixiyey Kalfadhigiisa 2aad ee Sanadkaan 2020, Fadhiyadiisii 11, 12, 13 iyo 14, Shuruucda kala ah;

1 Sharciga Maareynta Deeganka Sharci LR:001. 18 October 2020.
2 Sharciga Hay'adaha Samafalka & Horumarinta aan Dawliga ahayn Sharci LR:002. 19 October2020.
3 Sharciga Dhismaha Booliska Galmudug Sharci LR:003. 21 October 2020.
4 Sharciga Golayaasha Deeganka Dawladaha Hoose Sharci LR:004. 22 October 2020.

Mudane Madaxweyne adiga oo gudanaya Waajibkaaga Dastuuriga ah waxaan kusoo gudbinaynaa 4 taan Sharci ee kor ku xusan si aad ugu meel-mariso Xeer Madaxweyne, kadibna loogu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

Naga guddon Mudnaan iyo Qaderin

Lifaaqa Shuruucdii Baarlamaanku

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha Baarlamaanka

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DOWLAD GOBOLEEDKA SOMALIYEED EE GALMUDUG
GUDDOOMIYAHA BAARLAMAANKA GALMUDUG
SPEAKER OF THE GALMUDUG STATE PARLIAMENT
GALMUDUG STATE OF SOMALIA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**Tell: +252 61200500/ +252 614353333**
**E-mail.** speaker@galmudugparliament.gov.so **Website:** www.galmudugparliament.gov.so

**SHARCI Lr.002** **Taariikh: 31/10/2020**

**ANSIXINTA SHARCIGA HAY'ADAHA SAMAFALKA & HORUMARINTA AAN DOWLIGA AHAYN.**

**MADAXWEYNAHA D.G**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 50aad farqadda 12aad ee Dastuurka Dowladda Galmudug

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoonka Baarlamaanka Galmudug Tix: XGBGM/0025/20 ee 27 October 2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Hay'adah Samafalka & Horumarinta aan Dowliga ahayn ee Galmudug

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida Galmudug ay u qabto Sharcigaan o dhaqan gala

**Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan**:

**Qodobka 1aad:**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la ogolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Hay'adaha Samafalka & Horumarinta aan dowliga ahayn.

**Qodobka 2aad:**

Waxaa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha D.G saxiixo. Laga bilaabo marka la saxiixo waxaa la baabi'yay Sharci iyo Xeer kaste oo ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee D.G

**Dhusamareb 31/10/2020**

**Madaxweynaha D.G**
**Axmed Cabdi Kaarie**

***JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA***

***DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG***

*SHARCIGA HAY'ADAHA SAMAFALKA & HORUMARINTA AAN DAWLIGA AHAYN EE WADANIGA & CAALAMIGA*

**[SHARCI LR 002/2020]**

*October 2020*
*Galmudug State of Somalia*

**TUSMO**


**CUTUBKA 1AAD: QODOBO GUUD .......... 1**
Qodobka 1aad: Eray Bixin .......... 1
Qodobka 2aad: Ujeedooyinka Xeerkan .......... 1
Qodobka 3aad: Cidda Lagu Dhaqayo Xeerkan .......... 2
**CUTUBKA 2AAD: MABAA'DIIDA HAWLGALADA USHDA .......... 2**
Qodobka 4aad: Mabaa'diida USHDA .......... 2
Qodobka 5aad: Doorka Wasaaradda Qorshaynta Galmudug .......... 2
Qodobka 6aad Doorka Hay'adaha Kale Ee Dawladeed Ku Leeyihiin USHDA .......... 3
Qodobka 7aad: Waajibaadka Ururadda Aan Dawliga Ahayn .......... 3
Qodobka 8aad: Arrimaha Ka Reebban Ururrada Aan Dawliga Ahayn .......... 4
**CUTUBKA 3AAD: ASAASKA IYO DIIWAAN-GELINTA USHDA .......... 4**
Qodobka 9aad Xafiiska Diiwaangelinta USHDA .......... 4
Qodobka 10aad: Xilalka Iyo Waajibaadka Diiwaangeliyaha .......... 5
Qodobka 11aad: Diiwaanka Ururrada Aan Dawliga Ahayn .......... 5
Qodobka 12aad: Xogta La Gelinayo Diiwaanka Urur Kasta .......... 5
Qodobka 13aad: Asaaska Urur Aan Dawli Ahayn Oo Wadani .......... 6
Qodobka 14 aad: Xeer-Hoosaadka Ururka .......... 6
Qodobka 15aad: Ogolaanshaha Iyo Diidmada Diiwangalinta .......... 7
Qodobka 16aad: Asaaska Dalladaha Iyo Bah-Wadaagta .......... 7
Qodobka 17aad: Diiwaangalinta Dalladaha USHDAw .......... 8
Qodobka 18aad: I Sku Biirid Ama Midow Laba Ama Ka Badan Ee USHDAw .......... 8
Qodobka 19aad: Sharciyeeynta Dan-Wadaagta .......... 8
Qodobka 20aad: Wax-Qabadka Iyo War-Bixinada USHDAw .......... 8
Qodobka 21aad: Dukumintiyada Isku-Maamulka .......... 9
Qodobka 22aad: Hawl-Galka Ururrada .......... 9
Qodobka 23aad: Ogeysiinta Bedelaadda Xeer-Hoosaadka USHDAw .......... 9
**CUTUBKA 4AAD: URURRADA AAN DAWLIGA AHAYN EE CAALAMIGA .......... 10**
Qodobka 24aad: Diiwaangelinta USHDAc .......... 10
Qodobka 25aad: Shuruudaha Diiwaangelinta USHDAc .......... 10
Qodobka 26aad: Ogolaanshaha & Diidmada Diiwaangelinta USHDAc .......... 11
Qodobka 27aad: Shahaadada Diiwaangelinta .......... 12
Qodobka 28aad: Heshiiska Hawl-Fulin .......... 12
Qodobka 29aad: Cusboonaysiinta Ruqsadda USHDAc .......... 12
Qodobka 30aad: Wada Shaqaynta Ururradda Caalamiga & Kuwa Wadaniga .......... 12
Qodobka 31aad: Qalabka & Agabka Mashaariicda Dhammaatay .......... 13
Qodobka 32aad: Canshuurta Shaqaalaha & Ajuurada Diiwaangelinta .......... 13
Qodobka 33aad: Shakhsiyad Qaanuuneed .......... 13
Qodobka 34aad: Buugaagta Xisaabta Iyo Diiwaannada .......... 13
qodobka 35aad: Warbixinaha USHDAc .......... 14
**CUTUBKA 5-AAD: XADGUDUBYADA IYO CIQAABAHA .......... 14**
Qodobka 36aad: Xadgudubyada Iyo Ciqaabaha .......... 14
Qodobka 37aad: Anshax-Marin & Masuuliyad Ciqabeed .......... 14
Qodobka 38aad: Abaalmarinta USHDA/USHDAc .......... 15
Qodobka 39aad: Arrimaha Shaqada .......... 15
Qodobka 40aad: Daabacaadda .......... 16




I.

Qodobka 41aad: Xeer-Nidaamiye ........ 16
Qodobka 42aad: Luqadda Xeerkan ........ 16
**CUTUBKA 6AAD: BURIN & DHAQANGAL ........ 16**
Qodobka 43aad: Burin ........ 16
Qodobka 44aad: Dhaqangalka Xeerka ........ 16



I.

# CUTUBKA 1AAD: QODOBO GUUD

## Qodobka 1aad: Eray Bixin

Haddii aan si kale loogu sheegin nuxurka xeerkan, erayadan waxa loola jeedaa sidan hoos
Ku qoran

1. "**Urur Aan Dawli Ahayn**" (**UADA**) waxaa loola jeedaa shakhsiyaad iskood isku diray ama isu abaabulay ama isu-bahaystay, kana madax-bannaan dhaqdhaqaaq siyaasadeed, dhex- dhexaad ah, oo aan macaash doon ahayn kuwaas oo noqon kara heer Caalami, Qaran, Gobal, Degmo iyotuulo.
2. "**Ururrada Aan Dawliga Ahayn ee Waddaniga (UADAW)** waxaa loola jeedaa Ururrada Waddaniga ah ee ka diiwaan gashan Dawladda Galmudug kana hawl galadalka.
3. "**Ururrada Aan Dawli Ahayn ee Caalamiga (UADAC**)" waxaa loola jeedaa Ururrada aan Dawliga ahayn ee shisheeye kana sharciyeysan wax ka badan hal dal ooshisheeye.
4. "**Aan Macaash-doon ahayn**" Waxaa loola jeedaa wax ka durugsan dheefsasho ama faa'iido shakhsi- ahaaneed, waxaase jiri kara shaqaale mushahaaraysan ama leh dhaqdhaqaaq dakhli-abuurineed oo faa'iidadeeda lagu celin doono horumarinta bulshada iyada oo loo maraayo wax-qabadka Ururrada aan Dawliga ahayn(UADA).
5. "**Ka madax-bannaan dhaqdhaqaaq siyaasadeed"** Waxa loola jeedaa ururradu inaanay raadsan awood siyaasadeed isla markaana aanay u ololeyn xisbiyosiyaasadeed.
6. "**Wasiir**" Waxaa loola jeeda Wasiirka Qorsheynta, horumarinta dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga.
7. "**Wasaarad**" Waxa loola jeedaa Wasaaradda Qorsheynta, horumarinta dhaqaalaha iyo IskaashigaCaalamiga.
8. "**Agaasimaha Guud**" waxaa loola jeedaa Agaasimaha Wasaaradda Qorsheynta, horumarinta dhaqaalaha iyo IskaashigaCaalamiga.
9. "**Diiwaan'** waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu keydiyo Xogaha Ururrada aan Dawliga Ahayn.
10. "**Diiwaan-geliye**" waxaa loola jeedaa Shaqaale Dowladeed oo loo xilsaaray soo saarista shahaadooyinka diiwaan-gelinta Ururrada aan Dawligaahayn
11. "**Dalladda Ururrada**" waxaa loola jeedaa urur doonaya in uu dhammaan ururrada aan dawliga ahayn ee waddaniga ah dallad qura isugukeeno.

## Qodobka 2aad: Ujeedooyinka Xeerkan

1. in uu dhiiri-geliyo sidii ururrada samafalka ee aan dawliga aheyn, si hufan oo mug-leh uga qeyb-qaadan lahayeen, horumarkadalka.
2. in laga dhigo ururrada ha'yado sharci ah (legalpersonality).
3. in la isku duwo hawlaha horumarka ee ay Ururrada bulshada ee aan dawliga aheyni qabtaan si loo waafajiyo qorshaha dawladda Galmudug iyo siyaasadda dalka ee ku wajahan horummarkadalka.
4. in la dhiirigeliyo ururo Bulsho oo xoogleh oo madaxbanaan.
5. in loo hagaajiyo laxisaabtanka iyo hufnaanta(transparency and accountability) ga USHDA/USHDAC

**Qodobka 3aad: Cidda Lagu Dhaqayo Xeerkan**

1. xeerkan waxaa lagu maamulayaa Ururrada samafalka madaxa bannaan ee aan dawliga ahayn, isla markaana isugu jira wadani iyo caalami, kuwaas oo aan macaash doon ahayn (nonprofit organizations).
2. xeerkan ma saamaynayo hay'adaha Qaramada Midoobay, kuwa xirfadeed ama mihnadeed, iyo Ururrada bulsho ee aan hawlahoodu la xiriirin arrimahasamafalka.

## CUTUBKA 2AAD: MABAA'DIIDA HAWLGALADA USHDA

**Qodobka 4aad: MABAA'DIIDA USHDA**

Mabaa'diida asaaska u ah ha'yadaha ka hawlgala Galmudug waa kuwa soo socda:

1. **Kala sooc la'aan**: waa in aysan jirin kala faquuq noocu doono ha ahaade sida in qofka lagu takooro qoomiyad ama qabiilka uu yahay, siyaasadda uu raacsan yahay ama mabda' diineed ee uu aaminsanyahay , curyaanimo ama jinsiga lab ¡yo dheddig,
2. **Xisaab celin hufnaan ku dheehantahay:** oo loo sameeyo dhammaan daneeyeyaasha kala duwan sida deeq-bixiyayaasha, bulshada mashruuca ka faa'iidaya iyo maamulka dawligaah.
3. **Dhisidda awoodda gudaha:** iyada oo la hiigsanayo aragtida ah in kama dambaysta la gaaro isku filnaansho looga maarmo macaawinooyinka dibaddaah.
4. **Mashaariic saamayn wanaagsan oo waarta leh:** si bulshadu uga faa'iidaysato mustaqbalka.
5. **Mashaariicda¡yoadeeggalooqabanayobulshada:**waainaykudhisanyihiinbaahiyaha ¡yo mudnaanta lagu muujiyey qorshaha horumarinta Galmudug.
6. Waa in heerarka kala duwan ee fulinta mashruuca la adeegsado hababka ka qaybgalka bulshada iyodawladda.

**Qodobka 5aad: Doorka Wasaaradda Qorshaynta Galmudug**

1. **Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha & Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Galmudug** ayaa uga wakiil ah Dawladda Galmudug Diiwaan-gelinta, Maamulka iyo lsku-dubaridka ururrada aan Dawliga ahayn ee wadaniga, shisheeye ama Caalamiga ah.
2. Waxa ay mas'uul ka tahay kala doorashada goobta ama goobaha hawlgalka ee Ururku ka hawl geli karaan, waxa ayna ku salaynaysaa baahiyaha gobollada ¡yo degmooyinka dalka oo dhan iyada oo la raacayo qorshaha guud ëe horumarineed, si la isugu dheelli-tiro horumarinta bulshada - taas oo lagala tashan doono Ururka ka hawl gelaya iyo hay'adda dawladeed ee aykhusayso.
3. Waxa ay u taagan tahay bar-kulan isgaarsiineed oo u dhexeeya xukuumadda Galmudug iyo ururradaas. Dhammaan heshiisyada dhex mara Wasaaraddaha ¡yo Ururradaas, waxa nuqul laga siinayaa Wasaaradda Qorsheynta si ay marqaati ugaahaato.
4. Waxa ay Mas'uul ka tahay ku kala jihaynta mashaariicda hay'adaha dawladeed eeay khusayso.

5. Waxa ay Qiimayn ku samaynaysaa mashaariicda ay wadaan Ururrada aan dawliga ahayn, iyada oo u soo ban-dhigaysa war-bixinnada qiimeynta ay Wasaaraddu ku samaysay hawlahooda si loo saxo wixiikhaldan.
6. U fududeynta sameynta canshuur-dhaaf soo dejinta agabka xafiisyada iyo qalabka mashaariicda laga fulinayo dalkagudihiisa.
7. Waxa ay u fududeynaysaa soo-gelidda Galmudug iyo deganaansho qaanuuni ah (legal residence) khubarada shisheeye ee Ururradaas aan Dawliga ahayni uga baahan doonaan fulinta mashaaricdooda, iyada oo la waafajinayo xeerka shaqaalaha rayidkaah.
8. Waxa ay masuul ka tahay xog-siinta, tilmaamidda ¡yo hawlaha isku-duwineed ee Ururrada Caalamiga/shisheeye/waddaniga ah ee dalka ka hawlgala.
9. Waxa ay Masuul ka tahay Dejinta ¡yo soo saarista xeer-nidaamyada, wareegtooyinka, hagayaasha iyo amarradda lagu maamulayoUSHDA.
10. Waxa ay masuul ka tahay fududaynta bixinta canshuuraha shaqaalaha USHDA, baabuurta, guryaha iyo qandaraasyada iyada oo la raacayo shuruucda dawladeed ee arimahaas khusaysa.
11. Ururrada aan dawliga ahayn uma baahna diiwaangelin Gobol ama mid wasaarad kale, wasaaradda Qorsheynta oo keliya ayaa shaqadaa iskaIeh
12. Waxa ay Masuul ka tahay Hawlaha kale ee sharcigu uxilsaaro

## Qodobka 6aad Doorka Hay'adaha Kale Ee Dawladeed Ku Leeyihiin Ushda

1. Ka qaybgalka fulinta mashaariicda ay wadaan USHDA iyada oo la raacayo heshiiska ay wadagaleen.
2. La socoshada hawlaha maalinlaha ah ee ay wadaan USHDA ee khusaysahay'adaas dawladeed.
3. U tilmaamida baahida bulsho ¡yo mid hay'adeed iyada oo la raacayo qorshaha guud ee dalka, qorshaha dowlada Galmudug iyo kan hay'adaheeda dowliga ah.
4. Heshiis lagalida USHDA heermashruuc.
5. Ka qaybgalka la xisaabtanka iyo qiimaynta lagu samaynayo USHDA ee lashaqeeya.
6. U fududaynta shaqooyinka USHDA heer gobol, degmo iyotuulo.

## Qodobka 7aad: Waajibaadka Ururadda Aan Dawliga Ahayn

Urur kasta oo aan dawli ahayn oo si xeerkan waafaqsan lagu diiwaangeliyo waa:

1. In uu ixtiraamo, dhaqamada suuban iyo diinta Islaamkaah.
2. Barnaamijyada Ururrada Samafalka aan dawliga aheyn ee Caalamiga ahi waa in ay la jaan- qaadaan qorshaha guud ee horumarineed eeGalmudug.
3. Inhantidiisa,kharashkiisa,dakhligiisauuuadeegsadaaookeliyaujeedadiisamacaash raadis la'aanta ah si shuruucda dalka waafaqsan.
4. In dhammaan hawlihiisu noqdaan kuwo hufan oo isla xisaabtan leh, waana in uu si caqligal ah u bixiyaa mushaarada/gunnooyinka shaqaalaha, kirooyinka guryaha/gaadiidka iyo kharashaadka maamul iyo wax soo iibsi, si uu u kasbado kalsoonidadadwaynaha.
5. Hay'adaha samafalku waa ¡n ay canshuurta ka jaraan shaqaalahooda, fududeeyaana canshuurtaqandaraasyadaaybixiyaan,guryaha¡yogadiidkaayisticmaalan,waanainay

marka hore wasaaraddaha Qorshaynta iyo Maaliyadda qoraal ahaan ula wadaagaan xisaabta canshuurta ka dibna u bixiyaan si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 8aad: Arrimaha Ka Reebban Ururrada Aan Dawliga Ahayn

Ururrada aan Dawliga ahayn, waxaa ka reebban:

1. Ka qaybgalka hawlaha siyaasadeed iyo ololayaasha Doorashooyinka ee si gaar ah loo gacansiinayo urur ahaan, urur/xisbi siyaasadeed ama musharax/musharaxiin doorasho siyaasadeed.
2. Kicin, abaabul, gacansiin qalalaase, iska hor imaad gacan ka hadal leh ama dagaalo iyo ka qaybqaadasho hawlo ciidan ama tababarociidan.
3. Keenid, soo dejin, samayn, ka ganacsi hub iyo waxyaabaha qarxa ama ku lug Iahaansho falal argagixiso amaburcadnimo.
4. Ku hawlanaan ama caawin soo saaris, beerasho, sifayn, dhoofin, soo dejin, kaydin, ka ganacsi, haysasho, isticmaal ama qaybin maandooriye.
5. In loo isticmaalo dhaqaalaha iyo hantida ururka, wax kasta oo lid ku ah danaha Galmudug, caqiidada diimeed, anshaxa bulshada, caafimaadka, xasiloonida dalka ama wax kasta oo ku wajahan qabyaalad iyotakoor.
6. In dhaqaalaha iyo hantida ururka loo adeegsado hawloganacsi.
7. Waxaa ka reebban Madaxda iyo shaqaalaha USHDA qaadashada iyo ku lug-lahaanshaha qandaraasyada uu bixiyo ururka uu u shaqeeyo ama madaxda kayahay.
8. Bixinta xogta ururka taas oo si gaar ah cidi ugafaa'iidaysanayso.
9. Fal kasta oo kale oo ay reebeen shuruucdaGalmudug.
10. hadii qof madaxda ama shaqaalaha USHDA kamida xog uu bixiyay si gaara looga fa'iidaysto waxa uu mutaysanayaa sharciga ciqaabta musuqmaasuqa.
11. Mashruuc loogu talagalay deegan cayiman oo ka mida deegaanada Galmudug marayna habraacii sharciga ahaa looma wareeji karo deegaan kale
12. Hadii USHDAC/USHDA ay qandaraas waa in lawaafajiyaa sharciga qandaraasyada DGGM.
13. hadii la arko USHDA/USHDAC iyada oo ka shaqaynaysa waxa ay sheegatay waxaan ahayn waxaa loo aqoonsanayaa in ay ku kacday Musuq.

# CUTUBKA 3AAD: ASAASKA IYO DIIWAAN-GELINTA USHDAW

## Qodobka 9aad Xafiiska Diiwaangelinta Ushda

1. Wasaaradda Qorshaynta waxa ay yeelanaysaa xafiis qaabilsan diiwaangelinta Ururrada aan Dawligaahayn.
2. Masuulka waaxdan waxa uu noqonayaa diiwaangeliye ururrada aan Dawligaahayn
3. Diiwaangeliyaha waxaa lagu dooranayaa iyada oo loo marayo hab tartan si waafaqsan xeerarka shaqaalaha Rayidka ah Qodobkiisa5-aad.

### Qodobka 10aad Xilalka Iyo Waajibaadka Diiwaangeliyaha

Xilalka iyo waajibaadka diiwaangeliyaha waxa ay noqonayaan kuwan soo socda:

1. In uuururiyo dhammaan xogaha looga baahan yahay USHDA si loodiiwaangeliyo.
2. In uu diiwaangeliyo Ururrada aan dawligaahayn.
3. In uu hayo, xafido, ilaaliyo diiwaanka guud ee Ururrada aan Dawligaahayn.
4. In uu isku xiro, xiriiriyo Wasaaradda iyo Ururrada aan Dawligaahayn.
5. In uu ururiyo warbixinada iyo qorshayaasha Ururrada aan dawligaahayn.
6. in uu xaqiijiyo sharcinimada ururada aan dawliga ahayn ee isdiwaan gelinaya.

### Qodobka 11aad: Diiwaanka Ururrada Aan Dawliga Ahayn

1. Waxaa la abuurayaa diiwaan guud oo lagu ururiyo dhammaan Ururrada aan Dawliga ahayn ee xeerkaninidaaminayo.
2. Diiwaanka guud waxaa qayb-qayb loogu diiwaangelinayaa Ururrada aan dawliga ahayn ee wadaniga ah, shisheeye, Caalamiga ah iyo Dalladaha Ururrada.
3. Diiwaanka waxaa la gelinayaa ururka marka shahaadada lasiinayo.
4. Diiwaanka guud waxaa loo xirayaa sanad sanad, iyada oo lagu xusayo diiwaanka taariikhda la diiwaangeliyayururka.
5. Ururka aan dawliga ahayn ee sanadka dhexdiisa laga laalo shahaadada ama lagala noqdo shahaadada, waxaa laga saarayaa diiwaanka magaciisa, iyada oo la xusayo sababta laalista ama kala noqoshada, marka ay dhammaato mudada cabasho ama la diido cabashadiisa haddii shahaadadiisa lagaga laalay si xeerkanwaafaqsan.
6. Ururka laga hakiyo shahaadada sanadka dhexdiisa ama laga qaado talaabo kale oo anshax-marin waxaa lagu xusayaa diiwaanka hakintaa ama talaabada kale ee anshax- marin ee lagaqaatay.

### Qodobka 12aad Xogta La Gelinayo Diiwaanka Ururkasta

Ururka aan Dawliga ahayn ee loo diiwaangeliyo si xeerkan waafaqsan, waxaa loogu qorayaa diiwaanka xogtaan soo socota:

1. Magaca ururka aan Dawligaahayn.
2. Xaruntiisa, xafiisyada laamihiisa, cinwaankiisa, Guddida hoggaamiya lyo Agaasimaha fulinta ama cidda u dhiganta qaab-dhismeedkiisa iyociwaanadooda.
3. Waxyaabaha uu ka shaqeeyo iyo deegaanka uu kahawlgalo.
4. Hay’adaha, Wasaaraddaha ama Ururrada uu la shaqeeyo Dalka ama dalalka kale ee uu ka diiwaangashan yahay.
5. Lambarka shahaadada iyo taariikhdadiiwaangelinta.
6. Muddada shahaadada diiwaangelinta lyo macluumaad kasta oo kale oo lama huraanah.
7. Urur walba oo aan dawli ahayn oo loo diiwaangeliyo si xeerkan waafaqsan waxa uu yeelanayaa fayl lagu kaydiyomacluumaadkiisa.
8. Wasaaradda qorsheyntu waxa ay hubinaysa ujeedooyinka urur kasta oo aan dawli ahayn si loo hubiyo in aysan khilaafsanayn xeerkan iyo heshiisyada caalamigaah.

### Qodobka 13aad: Asaaska Urur Aan Dawli Ahayn Oo Wadan

1. Sarkaalka diiwaangalinta qaabilsan waa in uu sameeyaa faylal ¡yo diiwaanno kala duwan oo ay kala leeyihiin ha'yadaha caalamiga ah, kuwa wadaniga ¡yo Dalladaha Ururrada aan dawligaahayn.
2. Waa in ururku Diiwaangeliyaha u soo qortaa codsi ay ku qeexantahay:

B. Magaca ururka, xarfaha loo soo gaabiyo (markay jiraan), xarunta ¡yo laamaha ururka (markay laamo jiraan), Magacyada xubnaha asaasayaasha ururka, cinwaanka ururka oo ay ku jiraan teleefoonno ¡yo mareegta ururka

T. Ujeedada ururka iyo wadaagga/wadaagyada uu ka shaqaynayo

b. Degaanada uu ka hawlgelayo

t. Xubnaha Guddida Hoggaaminta iyo xubnaha maamulka.

J. Codsiga diiwaangelinta waa in uu ku saxeexan yahay masuulka ugusarreeya hay'ada ama cid uu awood u siiyey.

X. Codsiga diiwaangelinta lagu dalbanayo waa in ay weheliyaan:

b. Faahfaahin kooban oo khuseysa magaca ¡yo astaanta ururka.

t. Rasiidka bixinta canshuurta diiwaangelinta.

j. Waana in la siiya shahaado diiwangalin cadaynaysa in uu ka hawigali karo Galmudug oo dhan.

KH. Hay'adaha la diiwaangalsho waa in ay ahaadan kuwo magacooda ku qaadi kara masuuliyadda sharci ahaaneed.

D. Shahaadada diiwaangalinta waxaa bixinteeda iska leh Wasaaradda Qorsheynta waana in ay waafaqdaa xeerkan.

### Qodobka 14 Aad: Xeer-Hoosaadka Ururka

Xeerka ururka aan Dawliga ahayn waa in ay ku qeexan yihiin:

1. Magaca rasmiga ah ee Ururka oo aan hore loogu diiwaangelin urur hore oo aan Dawli ahayn, shirkad ama cidkale.
2. Hadafka, ujeedada iyo hawlahaUrurka
3. Tirada xubnaha asaasayaasha, haddii lagu biiri karo hab-raaca loogu biiri karo iyo habka la isaga saarikaro
4. Hab-raaca doorashada Golaha/Guddida hoggaaminta iyo luminta xubinnimada Golaha/Guddidahoggaaminta.
5. Sida shirarka looqabanayo
6. Awoodaha iyo masuuliyadaha shirwaynaha (marka uu jiro) iyo Golaha/Guddida hoggaaminta.
7. Habka Doorashada, xulashada ama magacaabista Maamulka ururka iyo awoodaha maamulka.

## Qodobka 15aad: Ogolaanshaha Iyo Diidmada Diiwangalinta

1. Diiwaangeliyuhu markuu helo codsiga diiwaangelinta ee ururka, waxa uu hubinayaa in dhammaan shuruudaha ku sheegan xeerkan uu buuxiyay, isagoo marka uu u arko lama huraan qaadayatalaabooyinkan:
    b. In uu dalbado soo dhamaystir macluumaad ama dukumenti ka dhiman.
    t. In uu dalbado ama raadiyo caddaymo dheeraad ah.
    j. in uu warbixin ka dalbado ama xog waraysto Wasaarada ama hay'ada xukuumadeed ee la shaqaynayo USHDAC /USHDA.
2. Diiwaangeliyuhu markuu hubiyo in shuruudaha xeerkan dhamaystiran yihiin, macluumaadka loo soo gudbiyayna xaqiiq yihiin, waxa uu u gudbinayaa Agaasimaha guud iyo Agaasime waaxeedyada shaqadoodu La xiriirto, codsiga oo ay ku lifaaqan yihiin, dhammaan macluumaadka uu ka helay codsadaha, warbixin koobaysa wixii uu talaabooyin qaaday ama xog dheeraada ku helay baaristiisii oo ay weheliyaan talooyinkiisa.

3. Wasaaraddu, markay hesho macluumaadka faqrada 2aad, waxa ay go'aan ka qaadanaysa jawaabna ka bixinaysaa codsiga diiwaangelinta ee ururka. Wasaaraddu waxa ay ansaxinaysaa in la siiyo diiwaangalin ka dib marka ayhubiso:
    i. In Ururku uu buuxiyay shuruudaha xeerka kuqeexan.
    ii. In Dhammaan macluumaadkiisu dhabyahay.
    iii. In uu soo gudbiyey xogdhamaystiran.
4. Wasaaraddu waxa ay diidaysa ansaxinta diiwangalinta haddii ayhubsato:
    i. In Ururku uusan buuxin shuruudahaXeerka.
    ii. In xogta uu soo gudbiyey ururku aysan dhabahayn.

## Qodobka 16aad: Asaaska Dalladaha Iyo Bah-Wadaagta

1. Dallad ama bah-wadaag ururo aan Dawli ahayn oo wadani waxaa aasaasi kara ugu yaraan 5 urur oo wadani oo diiwaangashan oo shaqeeya, kuwaas oo ka wada shaqeeya hal qayb (sector) ama u adeegga koox bulsho oo gaar ah, sida haweenka, Naafada, dhallinyarada, dadka laga tirada badan yahay Iwm. ama uu jiro hadaf guud oo mideeya ama aag juquraafiyadeed oo ay ka wada hawlgalaan
2. Dallad ama dan-wadaag waxaa loo abuuri karaa ujeedoah:
    i. Kobcinta iyo dhismaha kartiyeed ee Ururrada kubahoobay
    ii. Isku-duwida, qiimaynta, kormeerka iyo tayaynta hawlaha iyo barnaamijyada ay Ururradaasifuliyaan.
    iii. Difaacidda iyo u ololaynta Ururrada ku bahoobay Dallada amabah-wadaagta
    iv. Xalinta khilaafyada bahoobayaasha dhexdooda iyo khilaafka xubnaha dallada ama bah- wadaagta ¡yo hay'adaha la shaqeeyay. Fududaynta wada shaqaynta, iskaashiga ¡yo xiriirka xubnaha dallada amabah-wadaagta.
    v. fududeynta ,wadashaqaynta, iskaashiga iyo xidhiidhka dallad ama bahwadaag.



3. Waa in xubnaha ku bahoobaya Dallada ama dan-wadaagta ay qabsadaan shirwayne

dhamaan Ururrada ku bahoobay ergo u soo dirtaan oo ka qaybgalaan.

4. Shirwaynaha aasaaska Dallad ama Bah-wadaagwaa:
   i. In ergooyinka ka soo qabgelaya ay ka sitaan kalsooni qoraal ah Ururrada ay metelayaan.
   ii. In ay goob-joog yihiin Wasaaradda Qorshaynta ergo ka tirsan oo goob-joogenimo kaga qaybgelaysa iyo GuddidaUSHDA.
   iii. In uu jiro xeer-hoosaad ay ku dhisanyihiin kuna shaqaynayaan ergada Ururrada asaasayaasha intooda badan oo ay saxiixeen tiro aan ka yareyn 5urur.
   iv. In ay leedahay ujeedo cad oo xeer-hoosaadka ku qeexan oo loo midoobayo, taas oo waafaqsan tilmaamaha faqrada 2aad eeQodobkan.
   v. In la isugu doortaa jagooyinkiisa ¡yo xilalkiisa si dimuquraadi ah oomuuqata.
   vi. In jagooyinka iyo xilalka la isugu doortaa urur ahaan ee aanay is dooranshakhsiyaad

**Qodobka 17aad: Diiwaangalinta Dalladaha Ushdaw**

1. Ogolaansho la'aanta, diiwaangelinta, racfaanka go'aanka diidmada diiwaangelinta iyo dib u eegistiisa Dalladaha iyo bahwadaagta Ururrada aan Dawliga ahayn ee wadaniga ah waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobka 15 aad eexeerkan.

**Qodobka 18aad: Isku Biirid Ama Midow Laba Ama Ka Badan Ee Ushdaw**

1. Laba Urur Samafal aan dawli ahayn oo wadani ama ka badan oo diiwaangashan way isku tagi karaan ama way midoobikaraan;
2. Ururka cusub ee ka dhashay midowga ku xusan faqrada hore, dib ayaa loo diiwaangelinayaa, ka dib marka diiwaangeliyuhu, isagoo la tashaday Agaasimaha guud hubiyo in midowga cusub qaab sharciga waafaqsan loo sameeyay, iyada oo diiwaangelintii ururradii hore ee midowgu sameeyay laga saarayodiiwaanka.
3. Ururrada kala baxa mid walba waxa uu qaadayaa masuuliyadda sharci ahaan loogu leeyahay.
4. Ururku kuma wareejin karo masuuliyadihii saarnaa shirkad faa'iidosamaynaysa.

**Qodobka 19aad: Sharciyeeynta Dan-Wadaagta**

1. Waxa la sharciyayn doonaa Dallad/kulan urureed oo ay leeyihiin Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ahi oo hadda ka dib loogu yeeri doono "Dan-wadaagta Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddanigaah".
2. Dan-wadaagtu waxa ay noqon doontaa madal kulmisa Ururradaas oo looga jeedo isku-duwidda ¡yo wadashaqaynta dhammaan Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah ee ka hawl-gala Galmuduggudaheeda.
3. Sida loo aasaasayo, doorkeeda shaqo, xuquuqda iyo waajibaadka dan wadaagta, Wasaaradda ayaa ku soo saari doonta siyaasadnidaamisa.



**Qodobka 20aad: Wax-Qabadka Iyo War-Bixinada Ushdaw**

1. Urur kasta oo aan Dawli Ahayn oo wadani, sannad kasta waxa uu diyaarinayaa war-bixinta wax-qabadkiisa oo faah-faahsan, iyada oo la raacayo qaab-tilmaame war-bixineed oo ay diyaarin doonto WasaaraddaQorshayntu.
2. Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah ee si toos ah uga hela kaalmo dhaqaale deeq- bixiyeyaasha, waxa ay ku muujin doonaan kaalmadaas ay helaan iyo wixii lagu fuliyey warbixin sannadeedkooda ku xusanQodobkan.

**Qodobka 21aad: Dukumintiyada Isku-Maamulka**

1. Xeer-hoosaadka iyo dukumintiyada kale ee xubnaha asaasayaashu ay u gudbiyeen Diiwaan- geliyaha wakhtigìi la samaynayay codsiyada Diiwaan-gelinta ama kuwo ka danbeeyay Dastuurka iyo dukumintiyada loo gudbiyay Diiwaan-galiyaha waxa ay noqon doonaan dukumintiyada lagu salayn doono xukunka ama go'aan-qaadashada lagu kala saarayo haddii muranyimaaddo.
2. Ma jiri doono Urur aan Dawli ahayn oo hawl-geli doona ama fulin doona hawlahooda si ka hor imaanaysa dukumintiyadooda ay u soo gudbiyeen diiwaangaliyaha.

**Qodobka 22aad: Hawl-Galka Ururrada**

1. Ururka aan Dawliga Ahayn ee u diiwaan-gashan si waafaqsan xeerkan waxa uu xaq u leeyahay in uu bilaabo wax-qabadkiisa, kuwaasoo ay ka mid yihiin dhaq-dhaqaaq mashaariiceed oo waxtar u leh bulshada iyo sameynayo wax-soosaar oo ku jiheysan joogteynta wax-qabadka Ururka iyo barnaamijyada loo fulinaayo bulshada isla markaana waafaqsan shuruucda dalka.
2. Dakhli-abuur kasta oo ku jihaysan joogtaynta hawlaha ururka waa in ay ka muuqataa warbixin sanadeed loo soo gudbinayo Wasaaradda Qorsheynta sida ku xusan qodobka 20-aad eexeerkan

**Qodobka 23aad: Ogeysiinta Bedelaadda Xeer-Hoosaadka Ushda**

1. Isbedal kasta oo Xeer-hoosaadka lagu sameeyo oo ah beddelaad saameyn ku leh ujeedooyinkii hore ee Ururka ama magac, ama magacyo masuuliyiin xafiis, waxa lagu war-gelinayaa Diiwaan- geliyaha si qoraalah.
2. Ogeysiinta la siiyo Diiwaan-geliyaha waxa wehelin doona:
   b) Nuqulka go'aanka la gaaray oo ay saxiixaan mas'uuliyiinta awoodda u leh sida ku cadXeer-hoosaadka.
   t) Nuqulka Shahaadada Diiwaan-gelinta haddii qodobada xeer-hoosaadka Ururka ee la beddelay ay saameyn ku leeyihiin ujeedooyinka hore ee Ururka.
   j) Diiwaan-geliyuhu ka dib marka uu helo ogeysiinta waxauu:
      i. Gelinayaa Diiwaanka dhammaan waxyaabaha la beddelay sida lagu soo gudbiyayogeysiiska;
      ii. Bixin doonaa Shahaado cusub oo diiwaan-gelineed — markii loobaahdo
      iii. Ka saarayaa Diiwaanka wixii isbeddel lagusameeyey.

## CUTUBKA 4AAD: URURRADA AAN DAWLIGA AHAYN EE CAALAMIGA

### Qodobka 24aad: Diiwaangelinta Ushdac

1. Urur aan Dawli ahayn oo Caalami ahi kama shaqayn karo, kamana fulin karo mashaariic iyo barnaamijyo samafal ama horumarineed Deegaanadda Galmudug, haddii aanu Dawladda Galmudug uga diiwaangashanayn si xeerkanwaafaqsan.

### Qodobka 25aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Ushdac

Ururka aan Dawliga ahayn ee Caalamiga ah ee dalbanaya diiwaangeÌin, waa in uu buuxiyaa shuruudahan:

1. Waa in uu arji codsi diiwangelin oo ay soo saxeexeen xubnaha asaasayaasha ama cid si sharci ah uga wakiil ah, u soo gudbiyaa DiiwaangeliyahaGuud
2. Waa in uu si rasmi ah uga diiwaangashan yahay dalkiisa, xafiis shaqeeyana ku leeyahay
3. Waa in uu dalkiisa ama dalal kale ka fuliyay mashaariic la xiriira qaybaha uu ruqsadda udalbaday,
4. Waa in uu ka haystaa deeqbixiye aan dalka deganayn heshiiska iyo dhaqaalaha mashruuc ama mashruucyo uu dalka ka fulinayo. Waa in codsigiisa diiwaangelinta ay weheliyaan:
    - i. Ruqsadda diiwaangelinta eedalkiisa.
    - ii. Dukumintiga xogta ururreed/hay'adeed (Profile), oo ay ku qeexan yihiin ujeeddada ururka, qaab-dhismeedka ururka iyo maamulkiisa, Xarunta guud ee xafiiskiisa halka uu yahay iyo cinwaankiisa dalka, Sharciyeyntiisa waddanka uu asal-ahaan ka soo jeedo, Dalalka kale ee uu ka shaqeeyo xiriirka uu laleeyahay
    - iii. Nuqul ka mid ah xeer-hoosaadka ururka oo ay ku caddahay wadaagaha/wadaagayaasha (sector/sectors) ee uu ururku ka hawl gelidoono.
    - iv. Miisaaniyadda dhaqaale ee uu dalkagelinaayo;
    - v. Qorshe-sanadeedkiisa, iyo guud ahaan ilihiisadhaqaale.
    - vi. Cinwaanka iyo meesha uu ku yaallo xafiiska xarunta u ahUrurka;
    - vi. Caddayntii bixinta Ajuuradadiiwaan-gelinta;
    - vii. Qoraal cadayn ah, oo ay bixisay Wasaaradda Arrimaha dibeda u qaabilsan dalkiisa ama Safaarada dalkiisa ugu dhaw Soomaaliya oo ay ku cadaynayaan jiritaankiisa, wax-qabadkiisa ¡yo in ay mas uul ka yihiin wixii kayimaada;
    - ix. Taariikh-nololeedka (CVs) iyo shahaadada/shahaadooyinka shaqaalaha ka shaqeyn doona Galmudug ¡yo sababta loogu baahanyahay ¡yo caddayn dembi-la'aneed oo uu wadankiisa kasito;
    - x. Taariikh-nololeedka (CVs) asaasayaasha, sawirradooda ¡yo caddayndembi-la'aneed oo wadankooda ka sitan.
    - xi. Qorshaha ururka (workplan) ku talagalay in uu ku shaqaynayo oo ugu yaraan sannad ah ¡yo miisaaniyadda ku baxaysa oo madaxya leh (itemizedBudget).

5. Waa in mashruuca uu dalka ka fulinayo ujeedooyinkiisa iyo qorshihiisuba waafaqsan yihiin Siyaasadaha, xeerarka ¡yo qorshayaasha DawladddaGalmudug.
6. WaainuuogolaanshoqoraalahkahaystaaWasaaraddaamahay'ada xukuumadeed ee ku shaqada Ieh mashruuca ama barnaamijka uu dalka ka fulinayo.
7. Waa in uu mashruuca ama barnaamijka ku fulinayo qorshaha Wasaaraddaama Hay'adda xukuumada Galmudug la tashi kala sameeyo meelaha laga fulinayo.
8. Waa in uu ka furanayo Dalka xafiis leh awood go'aan qaadasho oo buuxda fulinta mashruuca iyo ogolaanshaha kharashkiisa.

### Qodobka 26aad: Ogolaanshaha & Diidmada Diiwaangelinta Ushdac

1. Diiwaangeliyuhu markuu helo codsiga diiwaangelinta ee USHDAC waxa uu hubinayaa in dhammaan shuruudaha ku sheegan qodobka hore uu buuxiyay Ururka aan Dawliga Ahayn Ee Caalamiga Ah, isagoo marka uu u arko lama huraan qaadaya talaabooyinkan:
   - i. In uu dalbado soo dhamaystir macluumaad ama dukuminti kadhiman
   - ii. In uu dalbado ama raadiyo caddaymo dheeraad ah.
   - iii. InuuwarbixinkadalbadoamaxogwaraystoWasaaraddaamahay'adda xukuumadeed ee la shaqaynayso Ururka aan Dawliga Ahayn Ee Caalamiga Ah,
   - iv. In uu xiriir la sameeyo masuuliyiin sare ama cidda uu deeqda ka soo qaatay ama u balanqaaday ama cid kale oo cadaymo ugabaahdo
2. Diiwaangeliyuhu markuu hubiyo in shuruudaha xeerkan dhamaystiran yihiin, macluumaadka loo soo gudbiyayna xaqiiq yihiin, waxa uu u gudbinayaa Wasaaradda codsiga Ururka aan Dawliga Ahayn ee Caalamiga Ah oo ay ku lifaaqan yihiin, dhammaan macluumaadka uu ka helay codsadaha, warbixin koobaysa wixii uu talaabooyin qaaday ama xog dheeraada ku helay baaristiisii oo ay weheliyaan talooyinkiisa u gudbinayaa agaasimaha ay khusaysoarrintaasu.
3. Agaasimuhu,markuuhelomacluumaadkafaqrada2aad,waxa uusoosaarayaa go'aan waafaqsan xeerkan
4. In Ururka aan Dawliga Ahayn Ee Caalamiga Ah, ee diiwaangelinta soo dalbaday uu u qalmo in la diiwaangeliyo marka uu kuqanco:
   - b) In uu buuxiyey shuruudaha xeerka ku qeexan.
   - t) In Dhammaan macluumaadkiisu ay dhab yihiin.
   - j) In Ururka aan Dawliga Ahayn Ee Caalamiga Ah, ee diiwaangelinta soo dalbaday aanu u qalmin in la diiwaangeliyo, marka ay ucadaato:
     - i. In aanu buuxin shuruudihii xeerku udhigay.
     - ii. In aanay dhab ahayn macluumaadka uu soogudbiyay.
     - iii. In baaris dheeraada iyo cadaymo kale oo lagu go'aan qaato loo baahan yahay.
5. Agaasimaha ay khusayso arrintan marka uu gaaro go'aamada ku qeexan xubnaha (i & ii) ee faqrada 4aad ee qodobkan, waxa uu go'aankiisa ogolaashaha diiwaangelinta ama diidmada u gudbinayaa Agaasimaha guud muddo aan ka badnayn (15) maalmood.
6. Agaasimaha guud muddada ku xusan faqrada 5-aad ee qodobkan dhexdiisa, marka

go'aanka Agaasimaha ay khusayso yahay diidmo, waxa uu soo saarayaa go'aan isaga oo Ia tashanayawasiirka.

7. Xaaladda faqrada 5aad ¡yo xubinta (J) ee faqrada 4aad, Agaasimaha Guud waxa uu samaynayaa baaris, isagoo raacaya talaabooyinka xubnaha faqrada 1aad ee qodobkan, dibna u soo saaraya go'aan waafaqsan tilmaamaha (ii & iii) ee faqrada 4aad ee qodobkan, iyada oo markan wasiirku aqbalayo soo jeedinta AgaasimahaGuud.
8. Mar kasta oo la ogolaado diiwaangelinta USHDAC, waxaa soo jeedinta Agaasimaha Guud loo gudbinayaa Wasiirka oo xeer wasiir ku soo saaraya una gudbinaya diiwaangeliyaha oo diiwaangelinaya tilmaamaha ku xusan qodobka 15-aad faqradiisa 3-aad eeXeerkan.

**Qodobka 27aad: Shahaadada Diiwaangelinta**

1. Ururka aan Dawliga Ahayn Ee Caalamiga, marka la diiwaangeliyo, waxaa Diiwaangeliyuhu siinayaa shahaadada diiwaangelinta.
2. Shahaadada diiwaangelintu waxaa lagu muujinayaa muddada ay ku dhacayso oo noqonaysa ugu badnaan (1) halsano.

**Qodobka 28aad: Heshiiska Hawl-Fulin**

1. Marka la diiwaan geliyo ka dib, Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USHDA) ee Caalamiga waxa ay heshiis shaqo (memorandum of understanding) la saxiixanayaan Wasaaraddaha, hay'adaha, ururrada iyo xafiisyada kale ee ay khuseyso (partners), nuqul heshiiskaas ahna waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Qorsheynta, iyada oo Diiwaangeliyuhu uu diiwaangelinayo.
2. USHDA oo Caalami ah kama bixi karo, waxna kama bedeli karo heshiiska ku xusan faqrada 1aad, haddiise ay yimaadaan sababo macquul ah oo USHDA, wasaaradii ama hay'adii la gashay iyo Wasaaradda Qorshaynta ku wada qanceenoo keenaya in
3. heshiiskii hore wax laga bedelo, waxaa dhinacyadu dib u gelayaan heshiis cusub, iyada oo markasta la raacayo tilmaamaha faqrada 1-aad ee qodobkan.

**Qodobka 29aad: Cusboonaysiinta Ruqsadda Ushdac**

1. USHDA ee Caalamiga ah, ee si xeerkan waafaqsan ku diiwaangashanaa ee muddada dhammaadka ruqsadiisa u baahda in uucusboonaysiisto ruqsadiisa waxa uu ruqso cusboonaysiin ah ka qaadanayaa Wasaaradda Qorshaynta.
2. Mudada ruqsaddu waa (1) halsano.

**Qodobka 30aad: Wada Shaqaynta Ururradda Caalamiga & Kuwa Wadaniga**

1. Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USHDA) ee Caalamiga ah waa in ay dhiiri-geliyaan maal-gelinta Ururrada Waddaniga ah ee aan Dawliga ahayn (USHDAW) kana fogaadaan in ay kula tartamaan hawlaha ay qaban karaan ururradaasi si loo xoojiyo tayeynta aqooneed iyo wax-qabad ee ururradaas waddanigaah.

2. Barnaamijyada Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USHDA) ee Caalamiga ahi waa in ay la jaan-qaadaan qorshaha guud ee horumarineed ee Galmudug. Waa in ay dhiiri-geliyaan, muujiyaan mashaariic wax-ku-ool ah oo la taaban karo, isla markaasna ay kala shaqeeyaan Ururrada Samafalka aan dawliga aheyn (USHDA) ee waddaniga ah deegaannada ay ka hawlgalaan kuna bari-taaraan xoojinta tayadooda aqooneed iyo wax-qabad si loo helo in barnaamijyadaasu sii socdaan siina waaraan oo isku- filnaansho lagagaaro.
3. Ururrada samafalka aan dawliga ahayn (USHDA) ee caalamiga ah kulama tartami karaan kuwa maxaliga ah mashruuc dhaqaalihiisu ka yar yahay$250,000
4. Ururrada samafalka aan dawliga ahayn (USHDA) ee caalamiga ah heshiis hoosaad wada shaqeyn ah lama geli karaan urur kale oo caalami ah mashruuc dhaqaalihiisu ka yar yahay$250,000

**Qodobka 31aad: Qalabka & Agabka Mashaariicda Dhammaatay**

1. USHDAC waa in hay’adda dawladdeed ee ay la shaqaynayaan iyo Wasaaradda Qorshaynta u gudbiyaan tira-koobka sugan ee agabka ¡yo qalabka mashruuc kasta oo sanadleah.
2. Markii mashruuc dhammaado, hantida mashruucaas waxaa lagu wareejinayaa Wasaaradda Qorshaynta iyo hay’ad-dawladeedkii aykhusayso.

**Qodobka 32aad: Canshuurta Shaqaalaha & Ajuurada Diiwaangelinta**

1. USHDAC waa in canshuurta dakhliga ee ku waajibtay shaqaalaha ka soo gooyaan una gudbiyaan Wasaaradda Maaliyadda sida ku qeexan xeerarka canshuraha dakhliga ee dawladdaGalmudug.
2. Ujuurada Ururrada samafalka aan dawliga ahayn waxa ay noqonaysaasidan:
   b) Ujuurada diiwaangelinta Ururrada samafalka aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa $ 1,000

   t) Ujuurada diiwaangelinta ururrada samafalka aan dawliga ahayn ee maxaliga ah waa $ 500

**Qodobka 33aad: Shakhsiyad Qaanuuneed**

1. USHDA waxa ay Ieeyihiin shakhsiyad qaanuuneed, wax way dacwayn karaan waana la dacwayn karaa, si xeerarka dalkawaafaqsan.
2. Xeerkani ma siinayo dhawrsoonaan (xasaanad) iyo xuquuq diblomaasiyadeed ururrada kudiiwaan-gashan.
3. Markuu shaqaale ajnebi ah oo u shaqeeya Urur aan Dawli ahayn oo Caalami ah uu bixin waayo qaan-sheegatooyin ama deyn lagu yeeshay, waxa deymahaas loo raaci doonaa ururkii dalka keenay ee uu ushaqaynayey.

**Qodobka 34aad: Buugaagta Xisaabta Iyo Diiwaannada**



1. Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USHDA) ee Caalamiga ah waa in ay

yeeshaan, si buuxdana u dhaqan geliyaan nidaam-xisaabeed dhan oo sax ah oo ka kooban hantidoodda, deymaha, dakhliga iyo kharashaadka si waafaqsan nidaam-xisaabeedka caalamiga ah ee lagudhaqmo

### Qodobka 35aad: Warbixinaha Ushdac

1. USHDAC waa in ay u soo gudbiyaan Wasaaradda Qorsheynta iyo ciddii kale ee ay la shaqeeyaan war-bixin wax-qabadeed lix biloodle ah iyo mid sanadle ah. War-bixintaas oo ay ku jiraan arrimaha soosocda:
   i. Wax-qabadkii fulay, wax-qabadkii baaqday, sababayntii iyo odoroska wax-qabad ee lixda bilood ee soosocda;
   ii. Kharashka miisaaniyadeed ee baxay, inta harsan, iyo odoroskeeda mustaqbalka;
   iii. Turun-turrooyinka ama caqabadaha lasoo dersay, duruustii laga bartay iyo talo-soo-jeedinta.
2. Wasaaraddu markay dib u eegto warbixinta loo soo gudbiyaywaxa ay:
   i. U yeeri karaan USHDA ee warbixinta soo gudbiyay si ay wax uga waydiiyaan macluumaadka la xiriirawarbixintooda.
   ii. Baaris iyo hubin ku samayn karaan xaqiiqdawarbixinta
3. USHDA ee Caalamiga ah ee ku guuldaraysta soo gudbinta warbixinta ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, Wasiirku waxa uu qoraal digniin xanbaarsan ku siinayaa waqti cayiman in ay ku soo gudbiyaan warbixintooda, iyada oo ogaysiin ka siinaya qoraalkaas hay'adda Xukuumadeed ee ay heshiiska wadagaleen.
4. HaddiiUSHDAeeCaalamigaaheeuhogaansamiwaayodigniintawasiirka,waxa ay wasaaraddu qaadanaysaa go'aan anshax marin ah.

## CUTUBKA 5-AAD: XADGUDUBYADA IYO CIQAABAHA

### Qodobka 36aad: Xadgudubyada Iyo Ciqaabaha

1. Urur walba oo ka hawl gala deegaannada Galmudug isaga oo aan diiwaangashanayn waxaa loo qaadanayaa in uu ku xad-gudbayXeerkan.
2. Ururkii lagu helo in uu kulug leeyahay hawlo ganacsi oo faa'iido doon ah waxaa loo qaadanayaa in uu ku xad-gudbay xeerkan.
3. Haddii lagu helo in uushaqaalaysiiyey qof ajnebi ah oo aan haysan ruqsad shaqo waxaa loo qaadanayaa in uu ururkaas ku xad-gudbay xeerkan.
4. Urur walba wadani iyo caalami kuu doonaba ha ahaade oo shaqo mashruuc bilaaba iyada oo aan warqad fasax ah looga haysan Wasaaradda Qorsheynta isla markaasna wada tashi kala samaynin wasaaradda mashruucu khuseeya waxaa loo aqoonsanayaa in uu ku xad-gudbay xeerkan.

### Qodobka 37-Aad: Anshax-Marin & Masuuliyad Ciqabeed

1. Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah ayaa

talaabo anshax-marin ka qaadaysa USHDA ee la yimaada hab-dhaqan ama fal anshax-marin lagu mutaysankaro.

2. Tallaabooyinka anshax-marin ee Wasaaraddu qaadan kartaa waxa aynoqonayaan:
   i. Digniin qoraalah
   ii. Cannaan qoraalah
   iii. Ganaax
   iv. Ka hakin ruqsadda diiwaangelinta muddo cayiman
   v. Ka Iaalis ama kala noqosho ruqsadeed
   vi. in lagu baahiyo Warbaahinta.

3. Wasaaraddu waxa ay xeer-nidaamiye faah-faahsan ka soosaaraysaa:
   i. Hab-dhaqannada iyo falal kasta oo ay talaabo anshax-marin ku mutaysan karan USHDAW &USHDAC
   ii. Hab-raaca anshaxmarinta
   iii. Habka fulinta talaabadaanshax-marineed
   iv. Xaddiga ganaaxa waxaa go'aan ka gaaristiisa leh Hay'adahaGarsoorka
   v. Muddada ruqsada la hakinkaro.

4. Wasaaradda qorshayntu waxa ay amri kartaa in magaca Ururka laga saaro diiwanka haddii aycadaato
   i. In ururku si ula kac ah u jabiyey Xeerarkadalka.
   ii. In ururku gudan waayey masuuliyadihii ¡yo waajibaadkii looidmaday.

5. Go'aanwalbaooanshax-marineed/ciqaabeed,waxaadacwadloogaqaadankaraa hay'adaha Garsoorka si la mid ah sida go'aamada Maamul ee kama dambaysta ah.

6. Haddii ururka ama qof u shaqeeyaa dembi galo waxaa lagu xukumayaa shuruucda dalka u yaal, sidoo kale haddii qof ajnebiya oo ha'yadda u shaqeeya ku lug leeyahay dembiga waxaa lagu xukumayaa shuruucda dalka uyaal.

7. Qofkasta oo ku xad gudba xeerkan waxaa laga mamnuucayaa in uu shaqo ka qabto urur Galmudug ka shaqeeya iyada oo loo eegayo culeyskafal-danbiyeedkiisa.

8. Qofka shaqaalaha ee lagu helo ku xadgudub xeerkan ama shuruuc kale oo dalka u yaal waxaa lagu qaadayaa xeerka ciqaabtaGalmudug

**Qodob 38aad: Abaalmarinta Ushda/Ushdac**

USHDA/USHDAC ee sanadkii lasoo dhaafay muujiyay shaqa wanaag waxaa lagu abaal marin karaa waxyaabaha soo socda:

1. Hab Maamuus munaasabadeed
2. Shahaada Sharaf

**Qodobka 39aad: Arrimaha Shaqada**

1. Arrimaha shaqada la xiriira waxa lagu dhaqayaa xeerka shaqaalaha rayidka ee Galmudug.
2. Heshiis shakhsi ama wadareed oo dheef (faa'iido) sarreysa ama badbaadin shaqo oo ka badan tan Xeerka Shaqaalaha, waa lala geli karaaShaqaalaha.

3. Ha'yadaha caalamiga ah waa soo shaqaalaysiin karaan dad ajnebi ah haddii ay haystaan ruqsad shaqo, lana waayo muwaadin reer Galmudug ah oo shaqadaasqabta.
4. Ha'yadaha caalamiga waxaa laga filayaa in ay si tartiib ah u dhimaan shaqaalaha ajaanibta ah uguna beddelaan shaqaalle wadani oo buuxsha kaalimaha maamulka sare.
5. Ha'yadaha caalamiga waa in ay mashariicdooda qayb ahaan ku daraan tababarro lagu kobcinayo awoodda shaqaalaha wadanigaah.
6. Hay'adaha waxa ay soo qoran karaan shaqaale ajnebi ah marka la waayo qof wadani oo xirfad ahaan kaalintaas buuxinkara.
7. Hay'adaha caalamiga ah waa in ay mashaariicdooda ku daraan shaqo abuurid mutadawacnimo ah si kor loogu qaado waayo-aragnimada dhallinta waxbaratay.

### Qodobka 40aad Daabacaadda

Diiwaangeliyaha guud waxa uu/waxa ay sannad kasta ku daabici doonaa/doontaa warbaahinta gudaha magacyada:

1. Dhammaan Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USHDA) ee ladiiwaan-galiyay;
2. Dhammaan Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USHDA) ee is baabi'yey ama iskood uburburay;
3. Dhammaan Ururrada aan Dawliga Ahayn ee Diiwaanka laga saaray si xeerkan waafaqsan.

### Qodobka 41aad Xeer-Nidaamiye

1. Wasaaraddu waxa ay soo saaraysaa xeer-nidaamiye dhamaystiraya xeerkan, ayna ku fulinayso xeerkan.

### Qodobka 42aad Luqadda Xeerkan

1. Afka (luqadda) Xeerkani waa Af-Soomaali, haddii af-kale lagu tarjumo, oo is-maan-dhaaf ka yimaaddo, waxaa loo noqonayaa nuxurka nuqulka Af-Soomaaliga ah.

## CUTUBKA 6AAD: BURIN & DHAQAN GAL

### Qodobka 43aad Burin

1. Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karinxeerkan

### Qodobka 44aad Dhaqangalka Xeerka

1. Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka uu Golaha Sharci-dejinta Galmudug ansixiyo, Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug na Saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.